



Lacagaha deeqda oo ardayda u caawiya siyaabo kala duwan PPS dhexdeeda

Lacagaha deeqda ee laga helay shirkado iyo shakhsiyaad ayaa door muhiim ah ka cayaara wanaajinta iyo ballaarinta waxbarashada ardayda Dugsiyada Dadweynaha Portland. Saddex ka mid ah lacagaha deeqda oo ay dhawaan heleen dugsiyada PPS ayaa muujinaysa siyaabaha kala duwan ee lacagaha deeqda ahi ay ugu faa'iideyn karaan ardayda.

Fiiro dhow:

Dugsiga Hoose ee Sabin: Dugsigu wuxuu \$14,500 ka helay Kaiser Permanente iyada oo la adeegsanayo barnaamij lacagaha deeqda ah u fura in la siiyo ururka kaasi oo ay shaqaalaha Kaiser mutadawiciin ka yihiin. Lacagta deeqda ah waxaa suurtageliyay waalidka ka tirsan Sabin ee Alexandra Varga, oo tabaruc ahaan uga shaqeeya dugsiga.

Maamulaha Sabin ee Reiko Williams ayaa sheegtay in lacagta deeqda ah loo isticmaali doono saddex siyaabood, iyada oo laga bilaabayo barnaamijka dugsiga ku saleysan ee dhanka wax la talinta oo loogu talagalay ardayda Maraykanka Madow ah. La taliyayaashu waxay noqon doonaan ardayda kulliyadda oo mushahar qaata oo ay tababareen [Holla Mentors](#) (oo ah urur dhaqan ahaaneed oo jawaabo dhanka talada ah bixiya) iyaga oo saddex ilaa afar saacadood la qaadan doona ardayda toddobaad kasta.

"Waxay ardayda ka hubin/eegi doonaan dhammeystirka shaqada guri 'homework' waxayna ka caawin doonaan dhanka hadafka wax qorista/akhriska iyo xisaabta iyo sidoo kale taageerooyinka dhanka bulshada," ayuu Williams ku qoray arjiga codsi ee deeqda lacageed.

Lacagta deeqda ah waxay caawimaad ka geysan doontaa in lagu maalgeliyo horumarinta kooxda hoggaaminta dhanka waxbarasho ee qiimeyn doonta ku dhaqanka iyo hirgelinta istiraatiijiyadaha si "loo yareeyo farqiga dhanka guul gaarida ee loogu talagalay ardayda aan sida fiican adeega u helin." Lacagta deeqda ahi waxay sidoo kale aadi doontaa kulamada iskaashi ee dhanka wax qorsheynta oo ay ku lug yeelayaan/ka qayb qaadaayaan maamulayaal ka kala socda dugsiyada hoose ee Sabin, Irvington, Boise-Eliot/Humboldt iyo Martin Luther King Jr. iyo dugsiga dhexe ee ardayda ka soo baxda dugsiga hoose ay soo galaan ee Harriet Tubman. Kulamada waxay ujeedadoodu tahay in ay wanaajiyaan natiijooyinka loogu talagalay Ardayda Maraykanka Madow ah.

Kani waa sanadkii labaad ee ay Sabin heshay lacagta deeqda ah ee Kaiser. Sanadkii la soo dhaafay, dugsigu wuxuu lacagtii deeqda ee Kaiser u isticmaalay in uu ku bixiyo waxka qabashada tacliimeed iyo saacado dheeraad oo loogu talagalay caawimaada dhanka waxbarashada.

Dugsiga Dhexe ee Lane: Dugsigu wuxuu \$5,000 ka helay heesaaga Paul Simon, oo ugu deeqay ururada degaanka intii uu ku jiray safarkiisii sagootinta ahaa. Simon wuxuu \$10,000 ugu deeqay PPS, iyada oo [\\$5,000 ay aadayso Barnaamijka Waqtiga Kala-guurka Bulshada ee dugsiga u dhow](#). Labada gooboodba way ka faa'iideysan doonaan Shaybaarka Barashada Beeraha, kaasi oo ah iskaashi ka dhexeeya PPS, Jaamacadda Bulshada ee Portland, Beeraha Nasashada & Raaxada Portland, iyo Jaamacadda Gobolka Portland.

Lane waxay lacagteeda ay ka heshay Simon u isticmaali doontaa in ay ka caawiso bixigta lacagta naadiga cunto karinta oo noqon doona qayb ka mid ah fasalka xirfadaha muhiimada la siinayo ee Lane. Ardaydu waxay la shaqeyn doontaa macallimiinta iyo arday ka socota Jaamacadda Bulshada ee Portland si ay beerista dhirta la cuni karo u bartaan iyaga oo jooga Beeraha Barashada isla markaana u isticmaalaya in ay cuntooyin ka sameeyaan.

“Waxaan muhiimada siinaa waa wax cunista caafimaadka leh iyada oo la isku ku darayo noocyo kala duwan oo miro iyo khudrad ah, oo fikrada ka dambaysaa tahay in la Cunayo Qaanso-roobaad ‘Eating the Rainbow,’ ayay sheegtay Jeandre Carbone oo ah maamulaha Lane.

Mashruuca sanadka oo dhan soconayaa wuxuu ardayga ka caawin doonaa in ay bartaan xirfadaha dhanka xisaabta iyo amniga iyo horumarinta bulsho, horumarinta niyadeed, luqaddeed, xirfadaha dhanka dareenka iyo socodka. Ardaydu waxay sidoo kale horumar ka gaari doonaan xirfahooda farsamo iyaga oo isticmaalaya Google Classroom, waxayna qorsheynayaan in ay sameeyaan buug cunto karis oo loo qaadan karo guriga marka la gaaro dhammaadka sanad dugsiyeedka.

Marysville K-8: Dugsigu wuxuu \$15,000 oo ah deeq lacageed ka helay Sanduuqa Saameynta Bulshada ee Nike iyo Ururka Bulshada Oregon kaasi oo ka caawimaad ka geysan doona in lagu dhiirigeliyo ardayda in ay firfircooni dheeraad ah yeeshaan.

Lacagta deeqda ahi waxay dugsiga u saamixi doontaa in uu beddelo calaamadaha ku yaala goobta lagu cayaaro ee bannaanka/dibadda ku taala si ardayda loogu dhiirigeliyo in ay firfircooni dheeraad ah yeeshaan inta lagu jiro socsocodka waqtiga biririfta/fasaxa, fasallada PE iyo biririfta yar. Sidoo kale, goobta baabuurta la dhigto iyo jidka baabuurta ku socoto ayaa dib loo rinjiyeyn doonaa si looga dhigo kuwo badbaado u leh ardayda iyo xubnaha bulshada ka tirsan. Iyada oo saddex meelood oo baaskiilka/bushkuleetiga lagu xirto lagu dari doono xagga hore ee dhismaha isaga oo ah hab lagu dhiirigeliyo carruurta si ay ugu kaxaysaan dugsiga iyada oo la siinayo meel ammaan ah oo ay ku xirtaan/qufushaan baaskiiladooda/bushkuleetiyadooda.

Shaqada meelaha baaskiilka/bushkuleetiga lagu xirto waxaa la filayaa in ay u bilaabanto si dhaqso ah, iyada oo shaqada goobta ciyaarta la filayo in la dhammeystiro marka la gaaro Juun.